TAXANAHA DHAXALREEB II/2008

Seebtember 2008 Ponte Invisibile Ed.

# Bandhig-buugeedka

## Caalamiga ah ee Hargeysa




Aadam Xaaji Cali Axmed

**Xuquuqda qoraalkan oo dhammi waxay u dhawran tahay qoraaga oo laga xidhiidhi karo aadamhaji@yahoo.com. Sawirrada waxaa qaadey Shiine Cilmi Kaahin.**

PONTE INVISIBILE

Buug elektrooniggan waxaa daabcay Ponte Invisibile Edizioni, REDSEA-ONLINE.COM Publishing Group
Sebtember 2008 – daabacisddii 1aad - Pisa

Taxanaha *Dhaxalreeb*:

[1] Jama Musse Jama, Juun 2005
*Layli Robot: Makiinad iswadda oo ciyaarta Layli Goobalay.*

[2] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo' iyo Mohamoud H. Nugidoon, Noofember 2005
*Qalabka iyo Suugaanta Qodaalka.*

[3] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Diisember 2005
*Mahadhadii Muuse Xaaji Ismaaciil Galaal.*

[4] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Jeenarweri 2006
*Kumaa ah Aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed: ma Carraale mise Gaarriye?*

[5] Jama Musse Jama, Abriil 2007
*Tirada iyo habka tirsiimo ee Afsoomaaliga.*

[6] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Meey 2007
*Miisaanku waa furaha kala asooridda badaha maansooyinka soomaaliyeed.*

[7] Ibraahin Yuusuf Axmed "Hawd", Juun 2007
*"Dhulgariir" waa digniin culus*

[8] Khaalid Jaamac Qodax, Oktoober 2007
Suugaan Xul ah iyo Abwaan Axmed Aw-geedi "Dheeraad"
Maansoyahan mudh baxay!

[9] Xasan C. Madar, Maarj 2008
Raad ka mid ah raadadkii addoonsiga.

[10] Aadam Xaaji Cali Axmed, Seebtember 2008
Bandhig-buugeedka Caalamiga ah ee Hargeysa

Taxanaha *Dhaxalreeb* waa qoraallo aan kalgal sugan lahayn oo sannadkiiba dhowr jeer kasoo baxa degelka redsea-online.com. Waxaa isku dubbarida qoraalladaas Jama Musse Jama, waxaana daabacda shirkadda buugaagta soo saarta ee Ponte Invisibile Ed. ee saldhiggeedu yahay Pisa, Italy.

Bilaash kaga soo rogo degelka www.redsea-online.com/e-books.

## Gogoldhig

Jaamac Muuse Jaamac

Waxaan kala soo noqdey safarkaygii, ka dib Bandhig-buugeedka Caalamiga ah ee Hargeysa, 2008, farxad iyo kalsooni dheeri ah oo aan ka qabo ummaddeena. Waxay dhacdadaasi i gelisay yididdiilo badan. Waxaan ku talo jirey inaan ka diyaariyo warbixin guud, hayeeshee markaan helay farriintan uu soo diyaariyey Aadam Xaaji Cali Axmed, oo bare ka ah Jaamacadda Hargeysa, kana qayb galay mid ka mid ah doodihii bandhigga, waxaan yiqiinsaday inay warbixintan dhammayska tirani ay akhriste kasta uga wanaagsan tahay tu aniga ama qabanqaabiyeyaasha kale diyaariyaan.

Waxaan Aadam uga mahadcelinayaa isha fiirada dheer ee uu kula socday bandhig guud ahaan.

Aniga wixii aan kusoo arkay HIBF-2008 (Hargeysa International Book Fair - 2008) waxay markale ii xaqiijisey in ummaddeennu ay wax qabsan karaan keligood:

- Waxa dadka lagu baabi'iyey cudur la yidhaahdo mashruuc hay'adi fuliso oo lacag yar oo sun ah dadka lagu siiyo suququl mooyee, inay adagtahay in ummaddeenu wax qabsato. HIBF waxaynu ku aragnay inaynu innagoon hay'adi ina caawin, oo muruqeenna iyo maalkeenna ku xisaabtamayna, meel awoodi inna dhigtaba, in aynu wax wada qabsan karno.

- Waxa dadka lagu baabi'iyey cudur la yidhaahdo "expert" ajaanib ah la'aantii wax ma qabsan kartaan. HIBF waxay cadday say inay kartida iyo "talent"-ka yaalla waddankeenna dhexdiisa, ee u badan dhallinyaradu, inay tahay tiir ma-liicaan ah oo taagan, oo hanan kara jiritaanka qaran kaligii wax qabsan kara.

- Waxa dadkeenna laga bixiyey sawir fool xun oo ah waa waqti-lumiyeyaal aan damiir kale lahayn, oo laga siman yahay in jaadka uun la cuno, shaxaadna lala soo tooso. Waa dhab oo qaadku ummaddeena wuu ragaadiyey, laakiin HIBF waxay cadday say in duntu wali nooshahay, oo damiirkii wali jiro oo aanu wada dhiman, una baahan yahay wacyigelin. Suuro gal may ahaateen in laba cisho ee bandhiggu socday markasta madasha la fadhiyaa buuxsamaysay, oo dadku debedda fadhiisanayeen, si ay u dhagaystaan doodaha ka socday bandhigga.

- Waxa la inoo hirgeliyey dacaayad raqiis ah oo ah inaan dadkeennu wax akhriyin, jeclayna buugga. Hadday mar hore ahaan jirtey sidaas, dadkeennu wuu is beddelay.

- Waxa maalqabeenkeenna laga bixiyey sawir fool xun oo ah xaaraameqaatayaal aan dadkan iyo dalkan lacag ka ururso mooyee aan ka lahayn dan iyo lexejeclo. Waa been cad. Waxa ka marag kacaya sida ay HIBF uga qaybqaateen, una kafaalaqaateen maalqabeenkeennu.

Waxaan arkay hooyo ilmo aad u yar xambaarsan, oo saygeediina kii kale laabta ku sido, oo lammaanahaas quruxda badan iyo labadooda carruur ah oo aan wali raad dhaqaajini, ay ku wareegayaan buugaagta dushooda, doonayaan inay iibsadaan, arkaan oo akhristaan buugaagta.




Waxaan arkey 20 carruur ah oo da'doodu u dhaxayso 17-20 jir oo intay iska soo raaceen arabsiyo, soo qaateen koofiyado ay ku qoran yihiin magaca iskuulkooda oo waliba ku xardhan midabbada calanka dalkoodu, intay soo wada kireysteen gaadhi, iska soo bixiyeen kharashkii, oo soo wada booqday bandhigga.



Labada sawir ee kor ku xusani waxay aragti buuxda kaa siinayaan qiimaha ay ummaddeenu u hayso arrimaha noocan oo kale ah. Waxaan ku rajo waynahay inay dhacdadani noqoto dhacdo-dhaqameed sannadle ah oo joogto ah, oo waddanka gudihiisa ka dhacda.

Jaamac Muuse Jaamac
Pisa, Italy.

# Bandhig-buugeedka Caalamiga ah ee Hargeysa

*Aadam Xaaji Cali Axmed*
*aadamhaji@yahoo.com*

Waxay dadkii markii danbe lahaayeen:
"Waligay maan arag bandhiggaas mid la mid ah"
"Faa'idadii aan ka helay bandhigga labadaas cisho waligay ma aan faa'iidin."
"Bandhiggaas waxa loo soo agaasimay si cajiib ah oo daacadnimo leh."
"Bandhiggaasi damiirka dadka ayuu dib u soo nooleeyay."

Hadalladaa iyo kuwa kale oo la halmaalaba, waa hadallo ay yidhaahdeen marti-sharaftii ka qayb galay bandhig-buugeedkii qiimaha badanaa ee lagu qabtay Caasimadda Somaliland ee Hargeysa.





Haddaba, waxa aan maqaalkaygan ugu talagalay in aan ku soo koobo aragtidaydii bandhigga, aniga oo ka mid ahaa dadkii lagu maamuusay ka qaybgalka goobtii ay munaasibadu ka dhacday.

Qoraalkani waxa uu diiradda saari doonaa qodobadan hoos ku qoran:

1- Dhacdooyinkii la-yaabka lahaa ee dhacay intii uu socday bandhiggu (Activities).
2- Waxyaalihii bandhiggani uu kaga duwanaa ama uu dheeraa bandhigyada kale iyo xafladaha kale ee la qabto.
3- Faa'idooyinkii laga gaadhay bandhiggan ee uu u soo kordhiyay bulsho waynta Somaliland.
4- Aragtidii dadkii ka qayb galay bandhigga.
5- Talo soo-jeedin ku socota bahda soo abaabushay bandhigga.
6- Gebogebo.

## 1. Waxyaalahii uu kaga duwanaa bandhiggani xafladaha kale ee dhiggiis ah

*I.Bilawgii xaflada*

Sida looga bartay xafladaha had iyo jeer la isugu yimaaddo Somaliland iyo dunidaba ha noqdaan waxbarasho, arimo bulsho, arimo caafimaad iwm, waxa had iyo jeer lagu soo casuumaa siyaasiin kale duwaan oo haya xilal kale duwan, dabeed taasi waxa ay ka leexisaa munaasibadaha ujeeddadii laga lahaa, waxaana hoos u dhaca qiimaha xafladda.

Laakiin bandhig-buugeedkan caalamiga ah oo maskaxdii ka dambaysay uu ahaa Jaamac Muuse Jaamac iyo qaban-qaabiyayaashiisa wuu ka duwanaa kuwaas oo dawr la taaban karo oo ay siyaasiyiin ku lahaayeen muu muuqan, manuu saamayn bandhigga, marka laga reebo Wasiirka Hiddaha iyo Dhaqanka mudane Cabdirisaaq Waaberi Rooble oo isagu matalayay xukuumadda iyo Wasaaradda Hiddaha iyo Dhaqanka.

*II. Habka ay xafladdu u furfurantay*

Waxa kale oo indhaha dadka iyo anigaba na soo jiitay heestii calanka Somaliland iyo waliba laba heesood oo waddani ah oo goobta bandhiga laga qaaday. Taasi waxa ay ahayd mid la yaab leh, oo aan inta badan hore u dhicin.

*"Waligay munaasibad tan oo kale ah oo lagu furay heeska calanka Somaliland ma aan arag,"*. Sidaas waxa ii sheegay mid ka mid ah ka qaybgalayaasha bandhigga.

Xafladdan wax ilaalo ah (Security) may joogin, sida looga bartay xafladaha kale ee dalka ka dhaca, kuwaas oo ay ka qaybgalayaashu dareemo kala duwan ka muujiyaan, taasi oo keentay in goobta ay yimaadaan carruur yar yar iyo dhallinyaro yar oo da'doodu hoosayso.





**2- Dhacdooyinkii la yaabka lahaa ee dhacay intii uu socday bandhiggu (Activities).**

Bandhiggani muu ahayn oo kaliya buugaag la soo bandhigay, waxa uu ahaa barmaamij dhan oo ay wehelinayeen dood cilmiyeedyo (panels) kala duwan oo ay soo bandhigeen dad khubaro ah (experts). Dooddani may ahayn sida doodaha kale (One way communication) oo ah in dhinacba mar hadlo, laakiin waxa ay ahayd (Two way discussions) oo ah dood laga wada qayb qaatay.

Doodahaasina waxa ay u dheceen sidan:

*a. Gobonnimo bilaasha maaha (dood ku saabsan gobannimada iyo xorriyadda muwaadinka)*

Dooddani waxa ay ahayd mid lagu falanqaynayay buugga uu qoray Jaamac Muuse Jaamac ee GOBANNIMO BILAASH MAAHA. Buuggaas oo ku guulaystay sannadkan aqoonsiga Buugga Sannadka ee ay bixiyaan ururka Qoraaga Somaliland. Waxaa ka qayb qaatay doodda Dr Cabdishakuur Sheekh Cali Jawhar oo ah dhakhtar ku takhasusay cudurrada maskaxda oo dagan dalka Kanada, Maxamed Beergeel oo ka tirsan ururka Article 32, iyo aniga [Aadam Xaaji Cali Axmed] oo ah sharciyaqaan wax ka dhiga kulliyada sharciga ee Jaamacadda Hargeysa. Waxa kale oo hordhaca bixiyay Khaalid Jaamac Qodax oo ka tirsan kooxda Hargeisa Readers Club iyo Farduus Siciid Dirir oo shaqaale ka ah Jaamacadda Hargeysa.




Dooddan waxa lagaga hadlay qiimaha Gobonnimada, qoraaga buugga, macnaha wayn ee uu xambaarsanyahay, sida ay gobonnimadu ula xidhiidho Artide 32 oo ka tirsan distoorka Somaliland, xorriyatul Qawlka (Freedom of speech) iyo xorriyadaha kale ee muwaaddinku leeyahay iyo dood ku saabsan guud ahaan xorriyada.

Waxa kale oo doodda ka qayb qaatay ka soo qaybgalayaashii oo ku darsaday aragtiyahooda kala duwan iyo sida ay ula muuqato.

*b. Dood ku saabsan suugaanta soomaaliga*

Waxa kale oo ay dooddii labaad ku saabsanayd sida suugaanta soomaaliyeed loo badbaadin lahaa, gaar ahaan Riwaayadihii iyo Geeraarkii, waxaana ka qayb galay abwaanno ay ka mid yihiin Dacar, Xasan Ganay iyo Ahmed Aw-Geedi.



Waxaana lagaga dooday sidii loo badbaadin lahaa suugaanta soomaalida, ka soo qayb galayshuna si fiican ayay uga qayb qaateen.

*c. Dood la dhex dhigay qorayaasha iyo akhristayaasha*

Waxa kale oo la qabtay dood la dhexdhigay akhristayaasha iyo qorayaasha oo aad iyo aad u xiiso badnayd. Waxana ka soo qayb galay Boobe Yuusuf Ducaale, Abwaan Yuusuf Shaacir, iyo Jaamac Muuse Jaamac oo ka socday qoreyaasha, dhinaca kale waxa ka soo jeeday akhristayaal badan oo su'aalo badan waydiiyay waydiiyay qorayaasha.







Dooddan waxa ay ahayd mid xitaa nooceedu uu cusub yahay oo aan hore loo arag waxa daadihinayay Dr. Maxamed-Rashiid Sh. Xasan. Waxa aan arkaayay iyada oo dadku wali farta taagayaan, xiise ay u qabaan awgeed xitaa iyada oo wakhtigu dhammaaday.

d. *Waxa la soo bandhigay waraaqo (papers) cilmiyaysan.*

Waxa iyaguna soo bandhigay waraaqo cilmiyaysan oo ku saabsan dhallinyarada iyo waddaninimada aqoonyahanno ay ka mid yihiin:

- Edna Adam Ismail Wasiirkii hore ee arrimaha dibadda Somaliland oo soo jeedisay warqad ka hadlaysa maxay dhallinyartu qaban karaan si ay u taageeraan dalkooda;

- Iid Cali Salaan oo ka tirsanaan jiray UFO, imikan deggan dalka UK una shaqeeya Welsh Refugee Council oo ka ah sarkaal sare;

- Iqbal Jhazbhay oo ah Safiirka Somaliland ee South Africa ayaa isna soo jeediyay warqad ka hadlaysa dib-u-dhiskii Somaliland dagaalka kadib iyo xidhiidhka caalamiga ah;

- waxaa isna halkaa hadal kooban ka jeediyay oo ka hadlay Isgaadhsiinta casriga ah Mustafe Shurki Jaamac oo ka socday Somaliland Forum.




Waxa hoggaaminayay kulankaa Maxamed Baaruud Cali oo ka tirsanaa kooxdii UFO ee muddada dheer ugu xidhnayd jeelkii Labaatan-jirow dowladdii kalitaliska ahayd ee uu hoggaaminayay Maxamed Siyaad Barre.

Waxa ay ahayd dood aad iyo aad fiican oo laga fa'iidaysatay, dadkii ka soo qaybgalayaasha ahaa aad iyo aad ayay doodda uga qayb qaateen. Waxa doodahaas qaarkood lagu soo jeediyey afingiriisi.

*e. Hadlo koobkooban*

Waxa iyana halkaa ka soo jeediyay hadallo koob-kooban Xasan Cabdi Madar, Dayib Askar, Maymuuna, oo dhammaantood ah qorayaal reer Somaliland. Waxaanay ka hadleen wixii ku kallifay qoraalkooda iyo sababtay u doorteen mawduuca ay wax ka qoreen. Waxaana la waydiiyay su'aalo door ah.

*f. Darandoori: ila dheh adna na dhagayso*

Waxa iyaduna jirtay hab cusub oo wax akhriska ah oo lagu soo bandhigay oo kaas oo layidhaah "ila dheh adna na dhagayso," oo ah hab ay laba qof wada akhriyayaan midi marka uu akhriyayo ka kalena uu dhagaysato, dadka kale ama qofkii la joogaana uu dhagaysanaayo. Waxaan lagu soo bandhigay labada buug ee kala ah AANADII NEGEEYE iyo LADH. Waxaan soo badhigay Mustafe Khayre, Farduus Siciid Dirir, Mustafe Adam Nur iyo Ilham Sh Muuse Axmed oo dhammaantood ka tirsan Hargeisa Reader Club.

*g. Booqashada buugaagta*

Mar walba waxa dhex socday dood cilmiyeedkaasi booqasho buugaagta dushooda oo kolba la eegayay xilliga u dhexeeya hadallada, taasi oo dad badan soo jiidatay.








**3. Faa'idooyinkii bandhiggu uu u soo kordhiyay bulsho waynta Somaliland.**

Sida ay iila muuqato bandhiggan waxa laga gaadhay faa'iidooyin badan oo dhinac walba leh. Waxa ugu muhiimsan in ay dadku ku baraarugeen wax-akhriska, waxa kale oo lagu baraarugay dhaqankeenii soomaaliga ah oo aad iyo aad loo soo nooleeyay intii lagu dhex jiray bandhigga.

Waxyaalaha kale ee laga faa'iiday waxa ka mid iyada oo ay soo dhiirradeen dad badan oo gabayaa ah, waxa aynu odhan karnaa waxa kale oo laga faa'iiday in ay soo baxaan dad badan oo anfici kara mujtamaca.

Sidoo kale bandhinggu waxa uu soo nooleeyay rajadii dadka da'yarta ah, markii ay arkeen dad aqoon leh oo ka hadlaya baahiyahooda iyo dantooda gaar ahaaneed.











**4. Dareenkii ay bixiyeen dadkii ka qayb qaatay**

Haddii aynu soo qaadano dareemadii ay ka bixiyeen dadkii ka qayb galay oo aan wax ka waydiiyay intii uu socday bandhiggu iyo markii uu dhammaaday, waxa ay u cabireen sidan:

*"Labadii cisho inta aan fad'iiday waligay maan faa'iidin, waxaanay ahayd wax la yaab leh,"* sidaa waxa yidh Abdishakuur Xasan oo ah suxufi madaxbanaan.

*"Bandhigan waxa aan ku ogaaday in dad badan oo Somaliland iyo Soomaali ahi ay wax badan qoreen,"* sidaa waxa yidhi Abdinaasir Baashe Cali ah ka soo qayb galay bandhigga.

*"Buugaagta iyo qorayaashu ay ka bixiyeen ayaan ka faa'iiday, waxa kale oo aan la yaabay buugaag cusub oo badan oo la soo bandhigay,"* sidaa waxa yidhi Shiine Cilmi oo ka tirsan shabakadda wararka SWDO.COM

*"Ma jirto xaflad tan oo kale ah, sida loo soo abaabulay ayaaba la yaab ahayd,"* sidaa waxa yidhi Rooble oo ah Freelance Journalist.

*"Waxa la yaab leh sida ay u soo noolaysay dhaqankeennii, tallaabo haboon, ayaa ka muuqday sida loo soo abaabulay,"* sidaa waxa yidhi Maxamed Xasan "Sallidhige" oo ah ardaydii ka qalin jabisay kulliyadda sharciga ee Jaamacadda Hargaysa.

*"Haddii la joogteeyo arrintani dadku waxa ay wada noqonayaan qoraa iyo akhristayaal wanaagsan, waayo arrintani way kicisay dadka,"* sidaa waxa yidhi Samatar Axmed oo ka mid ahaa ka soo qayb galayaashii, kana socdey Jaamacadda Burco.

*"Arintani waxa ay isu soo dhawaysay dadkii iyo buugaagtii, waayo hore looma arag buugaagtii iyo dadkii oo sida isugu soo dhawaada, waana kulan lagu guulaystay, waxaanay noqotay bar kulan kulmisay waxyaalo badan,"* sidaa waxa yidhi M. M Awale oo ka tirsan Hargeisa Readers club.

*"Arintani waxa ay ahayd mucjiso aan hore loo arag, kulamo hore oo badan ayaan ka qayb galay maa arag kan oo kale, dareenkayga ayay soo noolaysay,"* sidaa waxa tidhi Maymuuna oo ah gabayaa iyo qoraa.

*"Waxa uu ahaa kulan lagu soo qaban qaabiyay daacadnimo xoog ah, hab casri ahna loo soo qaban qaabiyay, oo isugu jiray hab casri ah iyo hab mucaasar ah,"* sidaa waxa yidhi Maxamed Axmed oo ka mid ahaa ka soo qaybgalayaasha bandhigga.

*"Wax lagu farxo ayay ii ahayd waayo waxa ay igu dhiiri galisay akhriskii iyo waliba cilmibaadhistii,"* sidaa waxa yidhi Yaasin Sh. Ibraahim Cabdillaahi oo ah ku takhasusay Cilmiga IT ga.

**5. Dhacdooyinkii layaabka lahaa ee aan arkay**

Waxyaabaha iga yaabiyay waxa ka mid ahaa

- Waa xafladdii aan arko ee dadkii ugu badnaa ay ka soo qayb galeen, kulan walba laga bilaabo markii ay furantay ilaa markii ay soo xidhmaysay.
- Waa xafladdii aan arkay dadkii ugu da'dayaraa ee ka soo qayb galay.
- Waa xafladdii aan arkay iyaga oo dadku isku dhiiri galinayaan in ay buugga iibsadaan.
- Waa xafladdii aan arkay ee ugu nidaamka fiicnayd, iyada oo aan cidina ilaalinayn.
- Waa kulankii aan arkay ee qof wal oo ka soo qayb galayba uu isku dayay in uu ka qayb qaato wixii socday.
- Waa xafladdii ugu fiicnayd ee si fiican loo dooday loona wada hadlay, iyada oo siyaasad ka madhan.
- Waa kulankii ugu horreeyay ee aan arkay ee dadku ilaa markii ay dhammaatay ay sii hadal hayeen.

Waxa kale oo xus mudan bandhiggii Sheeko iyo Shaahid ee tartanka suugaanta sheekooyinka gaagaaban oo lagu bixiyey hadiyado ciddii ku guulaysatay. Waxay tani ka mid tahay dhacdooyinka qiimaha badnaa ee ku lifaaqnaa bandhigga oo habeen gaar ah loogu qabtay madal kale sidii loo guddoonsiin lahaa hadiyadahaas. Waa dhiirrigelin aad iyo aad u qaali ah oo ku waajahan dhallinta, kuna soo dhawaynaysa qoraalka iyo akhriskaba.



**6. Talo soo jeedin ku socota bahda soo abaabushay bandhigga**

Marka u horraysa waan u hambalyaynayaa hawsha adage ee ay qabteen, isla markaana ay hirgaliyeen.

Dhawr talo ayaan u soo jeedinayaa, waxayna kala yihiin:

- in ay joogteeyaan sida ay iyaguba ballan qaadeen.
- in wakhtiga la kordhiyo, si taa loo helana waa in maalgelin loo helo gudo iyo dibadba
- in lasoo badiyo buugaagta lasoo bandhigayo, lana siiyo fursad intan ka badan oo dadku buugaagta kaga bogan karaan, kuna iibsan karaan
- in la joogteeyo tartan suugaaneedka sannadkan ku lifaaqnaa bandhigga ee Sheeko iyo Shaahid, islamarkaana la sameeyo tartanno kale oo kuwaa la mid ah
- in la soo martiqaado qoraayada, gaar ahaan kuwa dalka debeddiisa jooga, taasoo sida horeba loo sheegay u baahan dhaqaale iyo maalgelin.
- maaddaama, kulanka lagu magaacabay inuu yahay caalami "International", waxaa maqnaa buugaag caalami ah, kuna qoran afaf aan soomaali ahayn, sidaa darteed sannadaha soo socda dhankaasna halla eego.





**GEBOGEBO**

Waxa aan ku soo gunaanadayaa in lagu guulaystay bandhiggan oo la odhan karo boqolkiiba boqol wuu guulaystay. Jaamaca Muuse Jaamac iyo dadkii kale ee caawiyay waxa ay ku leeyihiin ammaan dadka agtiisa iyo ajar Alla agtiisa.

Waxa kale oo iyaguna kaalin libaax ka gaystay oo xusid mudan in la sheego hadday noqoto jaaliyadaha dibada iyo kuwa gudahaba. Gaar ahaan Ururrada Article 32, Somaliland Forum, Somaliland Societies in Europe (SSE), Ururka Qoraaga Somaliland, Jaalliyadda West-London Somaliland Community, Jaaliyadda Somaliland ee Finland iyo shakhsiyaad iyagu gaar uga qaybqaatay kafaalaqaadka dhacdadan.

Xagga gudaha waxa xusid mudan sida ay uga dhexmuuqdeen shaqada ururada HAVOYOCO iyo Naadiga Hargeysa Readers Club iyo dhallinyaro kale oo iyagu iskood isu xilqaamay sidii ay hawshu habsami ugu dhici lahayd.

Sida uu ii sheegay qabanqaabiyahu, Jaamac Muuse Jaamac, waxa iyana aad iyo aad uu ugu mahadnaqay kaalinta ay ka qaateen shirkadaha waddaniga ah ee TELESOM, DAHABSHIIL, CAWIL Co. iyo Hotel Imperial oo kafaalo-qaad dhaqaale ka gaystay bandhiggan.




Aadam Xaaji Cali Axmed, diyaariyaha qoraalkani waa Hormood ku xigeenka Kulliyada Sharciga Jaamacadda Hargaysa, waana bare-sare oo wax ka dhiga isla kulliyadaas.

Waxaa lagala xidhiidhi karaa teleefonka 00252-2-4403650 amase e-mail: aadamhaji@yahoo.com

**Ereyga gebagebada ee soo saaraha:**

Akhriste haddii aad tahay mid ka qaybqaatay bandhiggii buugaagta ee Hargeysa, amase aad ku sugnayd xilligaa Hargeysa, waxaannu kaa codsanaynaa inaad nala soo xidhiidho oo noo soo sheegto dareenkaaga ku saabsan bandhigga. Waxaannu gaar ahaan aad kaaga martinahay talo iyo tusaalayn, sidii sannadka soo socda loo sii hagaajin lahaa. Wixii war ah ee soo kordha waxa lagala socon karaa www.hargeysabookfair.com amase www.redsea-online.com.

Fadlna kusoo hagaaji talooyinkaaga: **info@hargeysabookfair.com**